

Gacaliye Waalidiin/Ilaaliyayaal:

Miyaad ogtahay in wiilkaaga ama gabartaada ay ka heli karto **Daryeel Caafimaad** dugsi? West Seattle High School inuu leeyahay Xarun Caafimaad oo Dusiga ku salaysan (School-based Health Center - SBHC) taas oo ku taal dhismaha oo adeegyadeeda ay heli karaan dhammaan ardaydu. SBHC waxa ka shaqeeya Neighborcare Health, xarunta caafimaadka bulshada oo u adeegta in ka badan 55,000 oo qof oo degan Seattle sannad kasta.

SBHC waxay bixisaa goobta saaxiibtinimada cunuga iyo dhammaan adeegyada dakhtar qoys. SBHC waxa ay bixisaa ballamo ka hor, inta lagu gudo jiro, iyo kadib dugsi oo waxay bixisaa adeegyadan soo socda:

- Qiimaynta iyo daaweynta dhibaatooyinka guud ee caafimaad
- Tallaalada, shaybaarada, iyo daawooyinka
- Jimicsiga isboortiga
- Daryeelka caafimaadka taranka
- Daryeelka Caafimaad ee maskaxda, bulshada iyo dareen ahaanba
- Daryeelka caafimaadka afka
- Daryeelka caafimaad ee ka hortagga, ay ku jiraan tubaakada, khamriga, iyo waxbarashada ka hortagga daroogada kale
- Xaq u yeelanshaha caymiska caafimaad iyo isdiiwaangalinta caawimada
- U gudbinaha bixiyayaasha kale ee daryeel caafimaad marka loo baahdo

Si loo isticmaalo adeegan, fadlan dhammaystir oo saxeeq foomamkan soo socda ee ku jira baakadan:

- | |
|---|
| <input type="checkbox"/> Foomka Taariikhda Caafimaadka (bogga. 2) |
| <input type="checkbox"/> Foomka Isdiiwaangalinta (bogga. 3) |
| <input type="checkbox"/> Foomka Oggolaanshaha (bogga. 4) |
| <input type="checkbox"/> Siidaynta Macluumaadyada Waxbarasho (Bogga. 5) |

Foomamka waxa lagu soo celin kartaa baakada dugsi ama loogu soo diri karaa boosta dugsi si gooni ah. Waxay sidoo kale keeni karaan shaqsi ahaan SBHC ama xafiiska weyn ee dugsi.

Siideynta dhamayska tiran ee foomka macluumaadka waxbarasho waxa ay u ogalaanayaan in diiwaanka dugsi ilmahaaga lala wadaago Neighborcare Health. Helitaanka diiwaanada dugsi waxay u suurogalisaa Neighborcare Health inay la shaqayso macalimiinta iyo shaqaalaha si loo horumariyo waxbarashada ardayda, fasalada, iyo dhaqanka.

Neighborcare Health waxa ka go'an inay u adeegto dhammaan bukaanada iyadoo aanu eegin awooddooda lacag-bixinta.

West Seattle High School SBHC waxay heshaa taageero ka timaad Qoysaska iyo Canshuurta Waxbarashada, laakin lacag siintani si buuxda uma daboosho kharashaadka hawlgalka barnaamijka sidaa darteed SBHC waxay bixin doontaa biilka caymiska marka ay suurto gal tahay. Fadlan dhammaystir qaybta caymiska ee foomka diiwaangalinta si aan u hubino inaan hayno macluumaadkaaga caymiska ee ugu danbeeyay.

Haddii aanad lahayn caymis caafimaad, SBHC waxay kaa caawin kartaa inaad isdiiwaangaliso qorshaha caymiska. Fadlan saxi "No Insurance" (Maya caymiska) sanduuqa ku yaal foomka isdiiwaangalinta oo xubnaha shaqaalaha SBHC way ku daba gali doonaan. Waxaad sidoo kale si toos ah u wici kartaa SBHC si aad u codsato caawimaad.

West Seattle High School waa nasiib in la helo SBHC oo waxaan rajaynayaa in aad u qaadi doonto faa'iidada khayraadkan cunugaaga. Haddii aad doonayso macluumaad dheeraad ah ama aad u baahan tahay caawimaad fadlan ka wac West Seattle High School ee SBHC 206-658-8048.

Si daacadnimo leh,
Ruth Medsker
Maamule

Haddii aad jeclaan lahayd koobi turjuman ee macluumaadka ku lifaaqan halkaan booqo www.neighborcare.org ama wac Xarunta Caafimaad ee Dugsi ku salaysan.

neighborcare | health
 Xarumaha Caafimaadka ee Dugsiga Ku-yaal
 Qaabka Taariikhda Caafimaadka Ilmaha

Si aad nooga gargaarto in la siyo gargaarka ugu fiican ilmahaaga, fadlan dhamaystir buuxintan kan sida ugu suurtagalsan. Si aad balan u dhigato, fadlan soo wac Xarunta Caafimaadka Dugsiga (lambarku waxa uu ku qoran yahay waraaqda). Waad mahadsan tahay.

Magaca Ardayga: _____ Taariikh Dhalasho: ____/____/____
 (Hore) (Danbe)

(Magaca Daabacan ee Qofka Foomka Buuxinaya)

(Xidhiidhka Ardayga iyo Qofka (haddii aanu isaga ahayn))

(Taariikhda foomka la buuxiyey)

SU'AALAHKA KU SAABSAN CUNNUGAAGA:

- Haa Maya Leeyahay Dhakhtar Daryeel Asaasi ama Kalkaaliye caafimaad? Haddii ay jawaabtu haa tahay, fadlan nasii:
 Magaca bixiyaha: _____ Telefoon lambarka #: _____
- Haa Maya Cunnugaaga miyaa lagu sameeyey baadhitaan jidh ama baadhitaan dhammaystiran ma lagu sameeyey sannadkii hore?
 Haa Maya Cunnugaagu miyuu lagu sameeyey baadhitaan ilkaha ah sannadkii hore?
 Haa Maya Cunnugaagu miyuu kaga qaadaa wax xasaasiyad ah DAAWAYNTA? 1) _____ 2) _____ 3) _____
 Haa Maya Cunnugaagu miyuu ka qaadaa xasaasiyad shay gii kasta ee kale? (cunnooyinka, boodhka, iwm.)
 Haddii ay jawaabtu haa tahay, fadlan qor: 1) _____ 2) _____ 3) _____
- Haa Maya Cunnugaagu miyuu had iyo jeer miyuu qaataa daawooyin joogto ah? (oo ay kamid yihiin fiitamiinada iyo daawooyinka aanu dhakhatr u qorin)
 Daawooyinka Qiyaasta daawooyinka Sababta
 1. _____
 2. _____
 3. _____

Cunnugaagu miyuu lahaa mid kamida waxyaalaha soo socda (Sax dhammaan inta ku khusaysa):

Dhibaatooyin Caafimaad Daran ama Socda:

- Dhibaatooyinka Araga Macaan Dhago cuslaan/Xanun Dhagaha ah
 Xiiq Dhiig yari Aad u dhuubn ma aad u cayilsan
 Dhibaatooyinka Wadnaha Dhiig kar Suus/dhibaatooyinka ilkaha

Dhibaatooyin Caafimaad Daran ama Degdeg ah, oo ay kamid yihiin xanuunada:

- Dhaawac laf ama Dhaawac Kalagoys Hablo baas Shil daran ama dhacitaan
 Xanuun kaadimareen ama Xanuun kelida ah Suuxid ama Miyir Doorsoon Qaaxo ama Xanuun TB

Dhibaatooyin kale oo Ku Saabsan Fayoobaanta:

- Werwer aad u badan ama walaac Dhibaatooyin Dugsi ama Dhibaatooyin Waxbarasho Khamri ama Dhibaatooyin Maandooriye
 Xaaladda Fejignaan La'aanta Dabeecad ama Dhibaatooyin Cadho Niyad jab

Xaalado kale oo Caafimaad: Jogista qaliinka, dhibaatooyinka dhaliinka, koriinka, cunaha, cagaarshow, kansar, qarracan, ama gaboodfal.

Faahfaahin ka bixi: _____

Hubi dhammaan ashyaada aad had iyo jeer dareento inay dhab u yihiin cunnugaaga:

- Cunnugaygu wuxuu leeyahay dabeecad gacan ka gaysata qaab- nololeed caafimaad qaba; cunnida cunnooyin caafimaad qaba, firfircoonaan, iyo badbaado qab.
 Cunnugaygu wuxuu ugu yaraan leeyahay hal qof oo wayn noloshiisa kaas oo daryeela waxyaalaha iyaga ku saabsan iyo cida ay caawimaad waydiisan karaan.
 Cunnuga yga ayaa ugu yaraan leh hal saaxiib ama koox saaxiibo ah kuwaas oo uu ku raaxaysto.
 Cunnugaygu wuxuu caawiyaa ama uu ka dhex firfircoon yahay kooxda dugsiga dhexdiisa, ururada caqiiqadada ku dhisan, ama bulshada.
 Cunnugaygu wuxuu awoodi akraa inuu ka soo doogsado niyad jabka nolosha.
 Cunnugaygu wuxuu leeyahay dareen rajo ay ka buuxdo iyo isku kalsoonaan.
 Cunnugaygu gaar ahaan wuxuu ku wanaagsan yahay qabashada shayada qaarkood sida xisaabta, ciyaaraha, masraxa, cunno karinta, ama wax qorista.
 Cunnugaygu iyo aniga ayaa ka wada-hadalay isbeddelada jidheed iyo niyadeed ee da'adooda.
 Cunnugaygu wuxuu ku haystaa TV iyo/ama kombuyuutar meesha ay seexdaan.

SU'AALAHKA KU SAABSAN QOYSKAAGA:

- Immisa qof ayaa ku nool gurigaaga? _____
 Haa Maya Miyey jireen wax isbadalo waaweyna ama carqalado sannadkii hore? Haddii ay haa jawaabtu tahay, faahfaahi: _____
 Haa Maya Qof kastoo ku nool guriga sigaar ama buuri miyey cabaan?
 Haa Maya Cunnada ma qoys ahaan ayaad u wada cuntaan?
 Haa Maya Qori miyuu yaalaa gurigaaga?

TAARIKHDA CAAFIMAADKA QOYSKA: (Sax dhammaan inta ku khusaysa) Aabo Hooyo Qaraabo Kale (Fadlan Sheeg)

Xiiq	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
kansar; Sheeg Nooca	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macaan	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Wadno Xanuun ama Faalij kahor da'da 55	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Dhiig Kar	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Subug saa'id ah	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Khamro ama Dhibaatooyin Maandooriye	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Niyad jab ama Werwer	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Dhimasho Kadis ah ama aan lagaranayn	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Dhiiga oo Isxidha	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Qaaxo (Xanuun TB)	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Waxyeeelayn Jidh ahaan, Galmo ama Hadal ah	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Xanuuno Kale ama Xaalado kale Sharaxaad ka bixi: _____	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

FOOMKA SAJILAADDA CAAFIMAADKA NEIGHBORCARE - Xarumaha Ku-yaala Dugsiga
Fadlan naga gargaar in aan si fiican kuugu adeegno oo na sii macluumaadka asturan ee soo socda
Fadlan dhmaystir Foomka Sajilaadda sannad kasta si aan ugu haysano xogta macluumaadkaaga cusub.

Magaca Ardayga: Danbe (Sr. Jr.)	Hore:	Dhexe:	Magacyada kale ee laistic- maalay: (haddii uu jiro)	Naanays:
---------------------------------	-------	--------	--	----------

Lambarka Sooshiyal Sekuyuuratiga Ardayga:	Taariikhda Dhalashada Ardayga: ____/____/____	Sinjiga Aradga (Doo-ro hal): <input type="checkbox"/> LAB <input type="checkbox"/> DHIDDIG
---	--	---

Cinwaanka Ardayga (Jid, PO Box):	Waalid, Wakiil Ama Qof Kale Oo Mas'uul Ah: Xidhiidhka: <input type="checkbox"/> Waalid <input type="checkbox"/> Awoowo/ayeeyo <input type="checkbox"/> Walaal <input type="checkbox"/> Kale _____ Magaca Waalidka/Wakiilka: _____
----------------------------------	--

Magaalada: _____ Jid: _____ Zip: _____	Taariikha Dhalashada Waalidka/Wakiilka: _____ Waalidka/Wakiilka Lab ama Dhedig: <input type="checkbox"/> Lab <input type="checkbox"/> Dhiddig
Telefon (Ardayga): _____ (telefonka gacanta)	Telfnka Guriga Waalidka/Wakiilka: _____
Iimayl (Ardayga): _____	Cinwaanka Waalidka/Wakiilka: <input type="checkbox"/> La mid ka ardayga

CIDDA LALA XIDHIIDHAYO XAALADDA DEGDEGA:
 Macluumaadka Waalidka/Wakiilka oo kale

Magaca _____	TAARIIKHDA _____
Xidhiidhka _____	Telefonka _____ (telefonka gacanta/kale)
Cinwaanka _____	Magaalada _____ Jid _____ Zip _____

AFKA (Afka koowaad ee lagaga hadlo guriga ardayga):

<input type="checkbox"/> AMHARIC (xabashi)	<input type="checkbox"/> HMONG	<input type="checkbox"/> SAMOAN
<input type="checkbox"/> CARABI	<input type="checkbox"/> KUURIYAAN	<input type="checkbox"/> SOMALI
<input type="checkbox"/> KAMBODIAN/KHMER	<input type="checkbox"/> LOATIAN	<input type="checkbox"/> ISBAANISH
<input type="checkbox"/> KANTONESE	<input type="checkbox"/> MANDARIN	<input type="checkbox"/> TAGALOG
<input type="checkbox"/> INGIIRISI	<input type="checkbox"/> MIEN	<input type="checkbox"/> THAI
<input type="checkbox"/> FARSI	<input type="checkbox"/> OROMO	<input type="checkbox"/> TIGRINYA
<input type="checkbox"/> FARANSIIS	<input type="checkbox"/> RUUSH	<input type="checkbox"/> FIYATNAAMIIS

KALE Afka: _____

Xaalada Ardayga
Aqoonsiga (ID) Ardayga: _____ Fasalka: _____
Dugsiga: _____ Tirada Qoyskae: _____
Daqliga Guud ee Qoyska: _____

SU'AAALO DHEERADA:

Naafu/Curyaan: Miyuu bukaanku leeyahay xaalad joogto ah oo ka xanibaysa hawlaha? HAA MAYA
Soo guure/Qaxooti: Bukaanku ma muhaajir ama qaxooti ama dhawaan soo-gal dalkan? HAA MAYA
Tirada guud ee guriga: Tirada xubnaha qoyska ee cashuurta dakhliga ee federaalka. _____
Tirada guud ee carruurta <18: Tirada carrurta guriga ka yar 18. _____
Heerka guriga: Bukaanku wuxu la nool yahay: Waalid keli ah (lab) Waalid keli ah (dhiddig) Labada Waalidba
Heerka Guriga: Ma aha guri laawe Guryaha Dadweynaha Dul saar Shelter Jidka Kala-guur Kale Lama yaqaan/lama sheegin
Heerka Shaqaalaha beeraha: Socoto Xilli-socde Ma aha Shaqaala Beereed
Muhaajir/qaxooti: Miyuu turjubaan u baahan yahay bukaankani? HAA MAYA
Heerka Askari Ahaanshaha: HAA MAYA

Qoloda Ardayga: <input type="checkbox"/> MARYKAN HINDI AH/DHALAD ALASKA <input type="checkbox"/> EESHIYAN <input type="checkbox"/> MADOW/MARYKAN MADOW <input type="checkbox"/> KA BADAN HAL JINSIYAD	<input type="checkbox"/> DHALAD HAWAIIAN <input type="checkbox"/> JASAA'IRKA KALE EE BAASIFIGGA <input type="checkbox"/> DIIDAY INUU QEEXO <input type="checkbox"/> CADDAAAN	Jinsiyadda Ardayga: <input type="checkbox"/> HISBANIC AMA LATIINO <input type="checkbox"/> AAN AHAYN HISBANIK AMA LATINO
--	---	---

Caymis Maleh: fadlan igala soo xidhoodh macluumaad dheeraada ee ikhtiyaarada caymiska
 Caymis Maleh

Magaca Caymiska **Koowaad:** _____
Magaca Kaqaygalaha: _____ Xidhiidhka: _____ Lab ama Dhedig: _____
Kaqaybgalaha Taariikhdiisa dhalashada: ____/____/____

Aqoonsiga/Qorsha #: _____ Caymiska # (haddii uu jiro): _____ Kooxda # (haddii uu jiro): _____
Magaca Kooxda (haddii uu jiro): _____ Taariikhda Hirgalka: ____/____/____ Telefonka Caymiska #: _____

OGEYSIISKA DHAQANKA GAARKA AH, FASAXIDDA IYO SHAHAADADDA SAXIIXA

OGGOLAANSHAHA DARYEELKA: Waxaan xaqiijinayaa in macluumaadka saajilaadda ee aan ku warheliyey kiliiniga uu hadda sax yahay oo waxaan fahamsanahay in wix isweydaaris macluumaad ee aan ulakas u gudbiyaa ay igu keeni karto inaan mas'uul ka no-do khartashka adeegyada la i siiyey oo buuxa. Waxaan fasax u siiyey sacala Caafimaadka/Ilkaha ee kiliiniga kor ku magacaaban inay sameeyaan daaweynta iyo dabiibka ay u arkaan xirfad ahaan iyo caafimaad ahaan inuu daruuri yahay ama talo ku Avon ciladda iyo daaweynta dhibaataada caafimaad. Waxaan fahamsanahay in daryeelka caafimaad ay bixin doonaan Dhakhtar, Xirfadyahan Kalkaaliso ah, Kaaliye Dhakhtar ama sacale kale oo ruqsad u haysta. Waxaan fahamsanahay in daryeelka ilkaha ay bixin donan Dhakhtarka ilkaha, Xirfadyahanada ilkaha, Kaaliyayaasha dhakhtarka ilkaha, ardayda ilkaha ama saxada ama tabarucayaal tababaran sida waafaqsan Xeerka Ku-dhaqanka Shaqada Ilaha ee Gobolka Washington. Oggolaanshahan wuux jiri doonaa ilaa oggolaanshaha lagu buriyo ogeysiis qoraal ah oo ku socda Agaasimaha Caafimaadka/Ilkaha. Hawshan iyo fasaxiddan waxay ku amaraysaa Neighborcare Health in ay u sii dayn karto sharikadda caymiska, CMS ama DSHS wixii macluumaad ay u baahdaan si loo qeexo dheefita la xidhiidha adeegyada. Waxaan halkan ku amrayaa caymiye kasta oo aan qorshe la leeyahay inuu si toosa u siiyo daryeel-bixiyaha wixii dheef ee qorshayaasha caymiska adeegyada la i-siiyey. Waxaan ogolahay in la bixiyo dhammaan kharashyada aanu buuxda u bixin caymiyaha la igmaday. Waxaan halkan ku amrayaa caymiye kasta oo aan qorshe la leeyahay inuu si toosa u siiyo daryeel-bixiyaha wixii dheef ee qorshayaasha caymiska adeegyada la i-siiyey. Waxaan ogolahay in la bixiyo dhammaan kharashyada aanu buuxda u bixin caymiyaha la igmaday

Ogeysiiska Dhaqamada Asturnaanta: Waxaan helay **Ogeysiiska Asturnaanta Shaqada** Caafimaadka Neighborcare oo sharxaya sida macluumaadka caafimaadkayga loo isticmaali karo ee loo nashiri karo iyo sidaan anigu ku heli karo.

SAXEEXA
XIDHIIDHKA QOFKA IYO ARDAYGA
TAARIIKHDA

Xarumaha Caafimaadka “Neighborcare Health” ee Ku-salaysan Dugsiga Oggolaansho Adeegyada Caafimaadka

Xarumaha Caafimaadka Neighborcare ee Ku-salaysan Dugsiga waxay ku yaalaan Dugsiyada Dadweynaha Seattle. Neighborcare Health waa inay haystaan foom oggolaansho oo ay saxiixeen waalid ama wakiil sharciga kahor intaan la siin adeegyada ardayga marka laga reebo xaaladaha ay shaciyada fedraalka iyo/ama gobolku ay u ogol yihiin ardayga in u helo daaweynta caynkaas ah iyadoo aan oggolaansho laga hayn waalidka/masuulka. Haddii ardaygu uu ka sajiilan yahay dugsi aanuse ka sajiilnayn Xarun Caafimaad o Dugsi Ku-taal (SBHC), wuxu ardaygaas heli karaa adeegyada kalkaalasada dugsiga.

Waxaan halkan ku codsanayaa oo ku ku amrayaa:

Daabac Magaca Ardayga: _____ /_____/_____
Magaca Hore Xarafka Dhexe Magaca Danbe Taariikhda Dhalashada

inuu helo adeegyada daryeelka caafimaadka jira iyo kuwa daruuri ay arkaan shaqaalaha Neighborcare Health SBHC. Adeegyadan waxa soo raaci kara, hase ahaatee aan ku koobnayn, la talinta caafimaadka maskaxda, baadhitaano caafimaad oo joogto ah, naturopathy, jimicsiyo isboorti, daryeel da'yarta oo hufan, qiimeynta iyo daaweynta cudurada daran iyo dhaawacyada, tallaalada, daraasadaha iyo eegidda dhiigga, sawirada, raajada iyo adeegyada caafimaadka ilkaha. Shaqaalaha SBHC waxay dhiirgeliyaan ka qeybqaadashada qoyska ee daryeelka ay siiyaan ardayda. Hase ahaatee, haddii aan joogin, anigu waxaan oggolaansho ku bixinaya in ardayga uu helo adeegyada. Ogolaashaha waxa gaar ahaan la isku siinayaa marka ama xaaladda ardayga kor ku magcaaban u iskeeno/ay iskeento si loo daweyyo marka aan maqanahay. Ogolaansho waxa waliba la siinayaa in loo gudbiyo daryeel iyo haddii loo baahdo, qaadis xaalad degdegga dhakhaatiir kale, xirfadlayaal daryeel caafimaad, cisbitaalo, meelaha baadhista, ama hay'adaha daryeelka caafimaad haddi ay sidaa gartaan oo ay la noqoto lagamamaarmaan Xarunta Caafimaadka Neighborcare iyo SBHC shaqaalaha. Awoodsiintan ama ogolaashahan ma ogolaanayo in adeegyo la bixiyo oggolaansho la'aanta ardayga, iyadoo/isagoo aan karayn in u sidaa yeelo mooyaane. Neighborcare Health waxa ka go'an abuuritaanka guri ah daryeel caafimaad iyo ku dhiiri galinta xdhiih aad u dheer oo u dhaxeeya bukaanada yo bixiyayaasha oo ay ku jiraan dawaynta, daryeelka caafimaadka maskaxda iyo ilkaha. Neighborcare Health waxa ay la shuraakowday bixiyayaal kale oo ku jira bulshada kuwaas sidoo kale u arka kara bukaanada aan u adeegno si ay u hubiyaan daryeelka in la isku duway.

Sida waafaqsan sharciga gobolka iyo/ama federaalka, marka oggolaansho loo bixiyo daryeel, macluumaadka daryeelka caafimaad waa qarsoodi. Waxyaabaha qaar ayaa reeban. Tusaale ahaan:

1. Ardaygu wuxuu oggolaansho ku dhiibaya macluumaad saxeeexan oo u bixiyo ama siidaayo.
2. Iyadoo muujinaysa/muujinaya khataraha waxyeelo u imanaysa qofka ama kuwa kale.
3. Iyadoo qabta/qabo dhibaato caafimaad oo nolasha halis gelinaysa oo u yahay/tahay da'deedu 18 sano ka hoos.
4. Iyadoo ay jirto sabab looga shakiyo gaboofal ama daayacaad.
5. Caddayn cudurada lakala qaado ama la isku gudbiyo, oo u baahan in loo sheego ama loo gudbiyo maamulka caafimaadka guud ee dadweynaha.

Ogolaashaha waxa loo bixinayaa in lala wadaago oo la isweydaarsado macluumaadka loo baahan yahay dhammaan bixiyayaasha daryeel caafimaad ee SBHC Xarunta Caafimaadka, oo ay ku jirto macluumaad isweydaarsiga ka dhexeeya la taliyaha caafimaadka maskaxda, kaaliyaha caafimaad ee hawgalka iyo kaaliyaha caafimaad ee dugsiga si loo siiyo daryeelka caafimaad ee ugu wanaagsan ardayga kor ku magcaaban. Si loo sahlo iskudubaridka daryeelka, xogta ardayga ee SBHC Ku-taal waxa heli kara shaqaalaha SBHC ee Neighborcare Health. Oggolaansho waxa la siiyey kalkaalasada dugsiga si ay u bixiso daaweynta aan dhakhtar qorin (tusaale, Ibuprofen, Tylenol, Tums, iwm.) sida uu u qoray dhakhtarka SBHC.

Ardaydu waxa kale oo ay ka heli karaan adeegyo caafimaad si madaxbanaani ah kiliinigyada Neighborcare Health ee kasta. Oggolaansho waxa loo bixiyey adeegyada lagu bixiyo mid ka mida kiliinigyada caafimaadka Neighborcare Health ee soo socda:

High Point Medical-Dental Clinic
(Kliniga High Point Medical iyo Dental Clinic): 206-461-6966
45th Street Medical-Dental Clinic
(45th Street Kliinikada Caafimaadka iyo Ilkaha): 206-633-3350
Meridian Medical Clinic:
(Kliinikada Caafimaadka Meridian): 206-296-4990
Columbia City Medical Clinic
(Kliinikada Caafimaadka Columbia City): 206-461-6957
Central District Dental Clinic:
(Kliinikada Ilkaha Central District): 206-461-7801

Rainier Beach Medical-Dental Clinic
(Kliinikada Caafimaadka iyo Ilkaha ee Rainier Beach): 206-722-8444
Greenwood Medical Clinic
(Kliinikada Caafimaadka Greenwood): 206-782-8660
Lake City Medical Clinic
(Kliinikada Caafimaadka Lake City): 206-417-0326
Georgetown Dental Clinic
(Kliinikada Ilkaha Georgetown): 206-461-6943

Ogolaanshaha waxa la siiyey adeegyada la bixiyo Neighborcare Health inta lagu da jiro wakhtiga ardaygu is qoray Dugsi ah Neighborcare Health SBHC ama wakhtiga adeegyada la siiyey farmasii kale oo ah Neighborcare Health. La noqoshada oggolaanshahan waxa la sameeyn karaa wakhti kasta iyada oo loo qorayo SBHC.

Saxeexa ardayga: _____ Taariikhda: ____/____/____

Waalid/Masuulka : _____ Tarriikhda: ____/____/____

Magaca Wakiilka Masuulka ee Sharciga (Daabac): _____ Xidhiidhka: _____

MACLUUMAAD MUHIIMA OO DHEERAADA

Sida waafaqsan Sharciga Gobolka Washington, SBHC waxay siin oo ka gargaari ardayda helitaanka daryeel dibedda ah haddii loo baahdo. Sida waafaqsan Sharciga Gobolka Washington, dhalinyartu si madaxbanaan ayey u heli karaan daryeelka caafimaadka dhalimada da' kasta iyada oo aan ogolaansho la'aan waalid/wakiil.

Dhalinyartu waxay si madaxbanaan u heli karaan adeegyada alkoloda iyo daroogada iyo latalinta jirrada maskaxda laga bilaabo da'da 13 ogolaansho la'aan waalid/wakiil. SBHC waxay ku dhiirigelisaa arday kasta inuu waalidka/wakiilka la soicodsiiyo go'aanada daryeelka caafimaad markii suurtagala. Markii ay munaasib tahay, SBHC waxay ka garagaari ardayga kala hadlaka xaaladahaas waalidka/wakiilka.

Iyada oo dhalinyartu ay bixin karaan oggolaanshaha daaweynta, oggolaanshahoodu sharci ahaan waxa looga baahan yahay ruqsada macluumaadka la xidhiidha uurka iyo cudurada galmada ku faafa (oo ay ku jirto HIV/AIDS testing). Oggolaansho ka socda ardayga 13 iyo ka weyn, iyo oggolaanshaha waalidka/wakiilka ardayga 12 iyo kayar ayaa sharci ahaan loo baahan yahay ruqsada macluumaadka la xidhiidha latalinta alkolada iyo muqaadaraadka iyo jirrada maskaxda.



Urur ku Salaysan Bulshada Foomka Ogolaanshada Waalidiinta/Ilaaliyaha Ansixinta 2015-2016

Caafimaadka Dadweynaha – Seattle & King County
Barnaamij Kusalaysan Ka qaybqaadashada-Dugsiga
401 5th Ave #1000
Seattle, WA 98104
206.263.8350

Neighborcare Health at West Seattle High School
3000 California Ave SW
Seattle, WA 98116
(206) 658-8048

UW Waaxada Dhimirka & iyo Culuumta Dabeecada
1959 NE Pacific Street
Box 356560
Seattle, WA 98195-6560
206-543-3750

Ogolaanshaha Siideynta Macluumaadka Waxbarashada ee Hoosyimaada Qoyska Xuquuqda Waxbarashada iyo Xeerka Asturnaanta (FERPA)

Waxaan ogolahay u fasaxaada macluumaadka waxbarashada ee ilmahayga ee Dugsiga Degmada Seattle wakaaladaha kor ku xusan. Waan fahamsanahay in macluumaadka waxbarashada ay ku jiraan, oo aanay laakiin ku xadidnayn:

1. Magaca ardayga iyo macluumaadka lagala soo xidhiidhayo
2. Tirakoobka ardayga: oo ay ku jiraan Heerka Waxbarashada Gaarka ah iyo Heerka 504 iyo midabka/ jinsiyada
3. Taariikhda Imaanshaha
4. Taariikhda Edaabta
5. Taariikhda Waxbarashadiisa iyo Darajadiisa
6. Taariikhda Darajooyinka Imtixaanada
7. Taariikhda Diiwaangelinta
8. Dhibcaha Waajibka
9. Waajibiyada Soo socda & Seegay

Siideyntaan waxaa ku jira in fasax loo siiyo shaqaalaha hayada inay heli karaan macluumaadka waxbarashada cunuga iyagoo isticmaalaya habka atomatikada ee macluumaadka looga helo Dugsiga Degmada Seattle.

Anigu waan fahmay ujeedada loo wadaagayo rekoorkani inay tahay in hayadaha kor lagu soo sheegay ay helaan warbixinta cunugayga ee xarunta caafimaadka ee iskuulka ku taal iyo/ama dhaqtarka caafimaadka maskaxda loona sheego warbixintiisa barnaamijka waxbarashada iyo horumarkiisa. Iyada oo laga wada shaqaynayo Caafimaadka Bulshada - Seattle & King Country, shaqaalaha Neighborcare Health waxa ay la shaqayn doonaan ilmahayga iyo/ama dugsigiisa/keeda si loogu dadaalo si loo hagaajiyo guusha ilmahayga ee dugsiga. Jaamacada Washington Waaxda Dhimirka iyo Culuumta Dabeecada kaliya ayaa la siin doonaa in ay guda galaan macluumaadka waxbarasho iyada oo loo jeedo samaynta xog ururiye ammaan ah si loo kaydiyo xogta. Waxaan ogahay in aan diidi karo ogolaanshahan aniga oo u diraya ogaysiis qoraal ah Dugsiga Degmada ee Seattle & Waaxda Ka qaybqaadashada bulshada, Ms: 32-159 P.O. Box 34165 Seattle, WA 98124.

Siidaynta macluumaadka waxay ka dhigi doontaa macluumaadka waxbarashada ee kor ku taxan, kuwaas oo ay ku jiraan xogta taariikhiga ah ee ardayga, kuwo ay heli karaan shaqaalaha wakaaladu laga bilaabo taariikhda ogolaanshaha saxeexa ilaa December 31, 2016. Anigu waxaan u ogolahay inuu Dugsiga Degmada Seattle siin karo macluumaadka wakaaladaha kor ku taxan (fadlan si cad u daabac):

Sexeexa Waalidka/Ilaaliyaha (Haddii ilmuhu uu yahay 17 ama ka yar): _____

Magaca Daabacan ee Waalidka/Ilaaliyaha: _____

Sexeexa Ardayga (Haddii uu yahay 18 ama kawayn yahay): _____

Taariikhda Maanta: _____

DAABAC Magaca Ardayga (Magaca hore iyo Ka dambe)

Taariikhda Dhalashada Ardayga

Lambarka Aqoonsiga Ardayga ID # **Lambarka ardayga ID # waxaa laga heli karaa kaadhka ASB, Kaadhka Warbixinta, I imaylka rasmiga ah ee dugsiga, ama adiga oo la xidhiidhaya dugsiga ilmahaaga**